

Hagaha ka qaybqaataha ee Is-Hagidda

Sida loola shaqeeyo bixiyayaasha madaxa banaan

Tusmooyinka

Ujeedo	2
Khayraadka adeeg bixiyaasha	2
Hordhaca is jihataynta	2
Filashooyinka Ka-qaybgalayaasha ee Is-jihataynta	5
Helidda adeeg bixiye madax banaan.	8
Ma tababara adeeg bixiyahaaga madaxa banaan	13
Kormeeridda adeeg bixiyaheyga madaxa banaan	16
Dabagalka qorshaheyga.....	17
Bixinta adeegyada is-jihataynta	17
Lacagta adeeg bixiyaheyga madaxa banaan	18
Shaqaa ka erinta adeeg bixiyaheyga.....	19
Cabashada	19
Linkiga	20

Ujeedo

Hagahan Is-Hagidda waxa loo qoray ka qaybgalayaasha doonaya in ay iskood u jiheeyaan Medicaid Guriga iyo Adeegyada Bulshada ku salaysan (HCBS) Adeegyada Dhaafitaanka Naafada Korriinka (DD). Jihaynta nafta ayaa diyaar u ah ka dhaafida Naafada Koriinka Dhamaystiran (CDD) iyo Ka Dhaafista Maalinta Dadka Waaweyn ee Naafada Korriinka (DDAD). Hagahan waa in la akhriyo marka la go'aaminayo haddii aad rabto inaad is-hagto adeegyadaada. Koxdaada waa inay akhriyaan oo ay fahmaan macluumaadka hagaha, maadama ay ka caawin doonto inay ku taageeraan markaad is haggayso.

Hagaha Is-Hagidda waxa ka mid ah:

- Macluumaadka guud oo ku saabsan sida is-hagidda u shaqeyso;
- Xuquuqda iyo mas'uuliyadda ka qayb galayaasha is-haidda adeegyada;
- Macluumaadka ku saabsan sida loo helo, loo shaqaaleysiyo, loo kormeero oo loo eryo bixiyeyaasha madaxa bannaan; iyo
- Sida biilasha iyo lacag bixinta u dhacaan.

Khayraadka adeeg bixiyaasha

Markaad haysato qof aad jeceshahay inuu noqdo adeeg bixiyahaaga madax banaan, ku hagaji bogga [Macluumaadka](#) ee shabakada DDD. Isku duwaha Adeeggaagu (SC) wuxuu ku siin karaa nuqul warqad ah ee kheyraad kasta oo aad u rabto bixiyahaaga.

Dhammaan linki-yada lagu bixiyay dukumeentigan waxay ku taxan yihiin dhammaadka.

Hordhaca is jihaynta

Waa maxay is jihayn?

Jihaynta shakhsiga waa sida aad u maarayso Medicaid HCBS DD adeegyada dhaafitaanka marka aad doorato inaad la shaqeyso bixiye madax banaan. Is-hagidda waxay ku siinaysaa masuuliyada inaad maamusho dhammaan dhinacyada adeeg bixinta. Adiga ayaa mas'uul ka ah nidaamka qorsheynta ee qofka ku saleysan. Is-jihaynta maaha adeeg laakiin waxay kuu ogolaanaysaa inaad xakamayso adeegyada aad hesho iyo cidda bixisa. Waxaad shaqaaleysiineysa qofka kula shaqeeya.

Adiga ayay ku xiran tahay inaad go'aamiso adeegyada aad u baahan tahay si aad u madax-bannaanaato inta suurgal ah. Waxa aad xaq iyo masuuliyad u leedahay inaad ka qaybqaadato inta ugu badan ee suurtagalka ah horumarinta iyo hirgelinta qorshahaaga.

Is jihaynta waxay ku salaysan tahay isu doodid iyo aayo-ka-tashiga shakhsiga:

- Isu doodida micnaheedu waa inaad ficil ama hadal u sameyso adiga awгаа.
- Go'aaminta nafta macnaheedu waa inaad haysato qiyaasta xakamaynta aad rabto qaybaha nolashaada kuwaas oo muhiim kuu ah.

Qaar ka mid ah faa'iidooyinka laga yaabo inaad la kulanto marka aad isku hageyso adeegyadaaga dhaafitaanka DD:

- Madax-bannaanida iyo isku-kalsoonanta oo korarta;
- Doorashada cidda gurigaga imaaneyso si ay u shaqeyso;
- Helitaanka bulshada oo kordhaya;
- Taageerada la kordhiyey si aad u ilaaliso hab nololeedkaaga gaarka ah iyo waxa aad door bidayso; iyo
- Ku qancidda adeegyada oo kordheysa.

Maxaa ka duwan is-jihaynta?

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad is-hagto Medicaid HCBS DD adeegyada dhaafitaanka markaad doorato inaad la shaqeyso bixiye madax banaan.

Bixiye **Madax banaan** waa qof u diwaan gashan bixiye Medicaid oo aadi aad shaqaaleysiise.

- Adiga ayaa mas'uul ka ah shaqaaleysiinta, tababbarka, jadwalka, kormeerka, iyo cayrinta bixiyahaaga madaxbannaan. Waxa kale oo aad taageeri doontaa adeeg bixiyahaaga madaxbannaan si uu u horumariyo oo uu u sameeyo barnaamijyada baxnaaninta.
- Adeeg Bixiye madaxbannaan wuxuu noqon karaa qof kasta oo u qalma oo aad doorato. Waxaad ka heli kartaa shuruudaha bixiyaha ee madaxa banaan ee [buuga xeerka DD](#), cutubka 7-aad. Habka isqorista Medicaid waxaa ka mid ah koontaroolka asalka iyo xaqiijinta aqoonta.
- Habka isqorista Medicaid waxaa ka mid ah koontaroolka asalka iyo xaqiijinta aqoonta. Dadka soo socda ayaa masuul kaa ah masuul ka ah, sidaas darteed looma kireysan karo inay adeegyadaaga bixiyaan:
 - Waalidkaagu marka aad ka yartahay da'da 19;
 - Masuulkaaga;
 - Xaaskaagu;
 - Ilaaliyahaaga; ama
 - Awoodaada abukaate.
- Waxaad **dooran karta** dersi, saxiib, ama xubin familka ka tirsan.
- Adeeg bixiyahaaga madaxa banaan ma **aysan** ansixin DHHD-Caafimaadka dadweynaha.
- Waxaad u dejisay sicir-bixiyahaaga madaxa banaan (inta aad bixineyso) ayadoo ku saleysan sicir-arka caadiga ah.

Marka aad adeegyo isku jihayso, waxaad dooran kartaa inaad isticmaasho oo kaliya adeeg bixiyaal madaxbanaan ama waxaad isticmaali kartaa adeeg bixiyaal badan oo kala duduwan. Kuwa kale ee bixin kara adeega DD:

- Adeeg **Bixiyaha hay'adda naafada ah ee horumarka** waa shirkad loo diiwaangeliyey inay tahay bixiyaha Medicaid oo ay xaqiijisay DHHS -Caafimaadka dadweynaha si ay u bixiyaan adeegyo naafanimoo oo horumarineed. Adeeg bixiyaha hay'addu wuxuu mas'uul ka yahay in uu shaqaaleysiyo ama heshiis la galo, sidoo kalena uu kormeero shaqaalaha iyo qandaraaslayda kula shaqeeya iyo howlaha kale ee maamulka.
- I **Ibiyaha** waa shirkad ama hay'ad ku qoran sida bixiyaha Medicaid ah laakiin aan loo ansixin sida adeeg bixiyaha DD. Ganacsayaashu waxay bixiyaan adeegyo ay ka mid yihiin Isbedelka Guriga iyo Gaadiidka iyo Nidaamka Jawaabta Degdegga ah ee Shakhsiyeed (PERS).

Aniga ma isku jihayn kara adeegyada?

Waad isku jihayn karta adeegyada marka:

- U qalma adeegyada DDD;
- Ka yar da'da 19 ama ka wayn (Waalidkaaga ayaa kuu jihayn klara markaad ka yartahay da'da 19);
- La kulan heerka hay'adda daryeelka guriga iyo adeegyada cafitaanka ee ku saleysan bulshada;
- Oo u qalma isla makrana heli kara Medicaid;
- Haysta qorsha shakhsiyeed, oo dhahaya inaad is jihayso ayaad rabta; iyo
- Ma rabtaa oo aad awood u leedahay inaad aqbasho in la kordhiyo mas'uuliyadda maamulidda adeegyadaada. Mas'uuliyaddaada kuugu korratya waxaa ka mid ah hubinta in adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan uu yahay mid la tababaray, aad ku tamashlayo shirarkaada, uu buuxiyo dokumentiyada adeegyada iyo billasha, iyo inuu dhammaan waajibaadyadooda kale oo dhan qabto.

Markaad go'aansanayso haddii aad rabto in aad is-jihayso adeegyadaada cafinta, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kooxdaada uga jawaabto su'aalahaan soo socda si aad u go'aamiso haddii is-jihayntu ay kugu habboon tahay:

- Baahiyahaaga caafimaad, habdhaqankaaga, iyo badbaadadaada ma dabooli karaan bixiyaha madaxbannaan?
- Ma fahansantahay shuruudaha adeeg bixiyaha madaxa bannaan?
- Ma sheegi karta marka aad heleyso taageero kuugu filan?
- Ma waxaad noqon doontaa mid go'doon ah oo aad u nugushahay in lagugu xadgudbo ama la dayaco?
- Ma fahamsan tahay waxa xadgudubka iyo dayacaadda laguugu geystay, oo awood ma u leedahay inaad soo sheegto xadgudub ama dayacaad?
- Ma ka baqi lahayd inaad soo sheegto tacaddiyo, dayacaad, khatar, ama musuqmaasuq sababtoo ah ma doonaysid inaad lumiso bixiyaha madaxa bannaan ama aadan dhaawacin xiriirka?

- Sidee ayaad ku heli doontaa una kireysaneysaa adeeg bixiyaal madaxbanaan oo caawiya gurigaaga ama bulshada?
- Sidee ayaad u qorshaysan tahay sidii aad u tababari lahyd una kormeeri laheyn lahaa bixiyeyaasha madaxa bannaan ee kula shaqeeya?
- Ma fahmaysaa habilitation iyo sida looga caawiyo adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani inuu qoro barnaamij?
- Markaad si joogta ah aad u ballamiso adeeg bixiya madax banaan uu kuu sheego inuu xanuunsanyahay, sideed ku heleysa baahiyahaaga?
- Ma taqaana sida qorshahaaga iyo adeegyadaad baddal loogu sameeyo?
- Ma fahansantahay lacagta, oo ay ka mid tahay faa'idooyinkaaga iyo miisaaniyaddada aad ku iibsaneysa adeeg?
- Ma fahansantahay sida isticmaalo nidaamka maaraynta kisaska dowlada loo xilsaaray? Miyaad awoodi doontaa inaad u isticmaasho si aad u soo dhameystirto biilka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan?
- Ma u sheegi kartaa bixiyahaaga madaxa banaan waxa aad jecshahay ama aadan jecli karin oo ku saabsan shaqadooda?
- Sidee ayaad u qorshaysan tahay inaad ku taageerto bixiyahaaga madaxa banaan markay qabaan su'aalo ku saabsan adeegyada ama lacag bixinta?
- Ma fahamsan tahay halista haddii aad doorato inaad dhammaan macluumaadka caafimaadka la wadaagin adeeg bixiyahaaga madaxa banaan?
- Miyaad ka baqi doontaa inaad ka cayrinayso adeeg bixiyaha madax banaan sababtoo ah ma doonaysid inaad lumiso bixiyaha ama aad waxyeelayso xiriir?
- Maxaad sameysa marka aad guriga joogto isla markana ay jirto xaallad degdeg ah?
- Ma dooneysa inaad caawinad ka aqbasho SC-gaada? SC-gaada ma kuu hagi doono adeegyadaada, balse waxa la heli karaa marka aad qabto su'aalo.
- Ma dooneysa inaad caawinad ka aqbasho SC-gaada? SC-gaada ma kuu hagi doono adeegyadaada, balse waxa la heli karaa marka aad qabto su'aalo.
- Ma dooneysa inaad qof weydiiso caawinaad la xiriirta is jihataynta?

Maxay yihiin adeegyada is jihataynta?

Adeegyada soo socda Medicaid HCBS DD dhaafitaanka waxaa laga yaabaa in isu jihatayso:

- Tignoolajiyada Caawinta
- Maalinta waxbarida Carruurta *
- Qiimaynta Wadatashiga
- Isdhexgalka bulshada* ^
- Qiimaynta Bedelka Deegaanka
- Wax ka bedelka Guriga
- *Guri-jooge*
- *Degenaanshaha madaxabanaan** ^
- *Nasinta*
- Shaqaaleynta la taageerayo – Raac-*
- Shaqaaleynta la taageerayo-Shakhsi*
- *Nolosha Qoyska ee la Taageerayo** ^
- Ku meel gaarka
- Gaadiidka

Adeegyada xiddiga leh (*) waa caawitaanka waxaana ka mid ah waxbarista. Adeegyada hormarinta ahi waxay u baahan yihiin in barnaamijyo la qoro oo aad sameyso markii aad adeegyada hesho. Iyadoo ku xiran baahidaada, adeegyada kobaca iyo hormarinta waxaa sidoo kale ku jira qorshaha taageerada dhaqanka iyo qorshaha badbaadada.

Adeegyada leh (^) waxaa laga yaabaa inay lahaadaan qayb ka mid ah oo la bixiyey qaab online ahaan, taas oo macnaheedu tahay in adeeg bixiyaha uu joogo meel ka duwan meesha aad adiga joogto iyo waxa uu kula mashquulinayaa aalad koronto ah oo aad labadiinaba iska arki kartaan aadna iska maqli kartaan.

Adeegyada ee *qoraalka Italics* waxay u baahanyihiin isticmaalka Booqashada xaqiijinta elektorooniga (EVV) iyo adeeg bixiyahaaga madax banaan u baahan doonaa qalab mobile ah (smartphone ama kompyuterka yar) si ay u hubiyaan inay soo galaan ama ka baxaan markii adeegyada la bixinaya.

Filashooyinka Ka-qaybgalayaasha ee Is-jihaynta

Isu jihaynta adeegyadaada waxay kuu ogolaaneysa inaad dhsito awoodaada. Waxaad go'aamineysa adeegyada iyo taageerida aad u baahantahay si aad u badiso madax banaanidaada. Waxaad xaq iyo masuuliyad ku leedahay inaad ka qeyb qaadato intii suuragalka ah si aad uga qeyb qaadato horumarinta iyo fulinta qorshahaaga. Adigaa ayaa ka mas'uul ah inaad shaqaaleysiiso, tababarka, jadwalkaaga, ilaalisid iyo inaad erido adeeg bixiyaashaada.

Maxay yihiin xuquuqdeyda?

Waxaad leedahay xuquuq la mid ah kuwa qof kasta oo hela adeegyada hormarinta naafada ah oo ay ka mid yihiin xuquuqda helitaanka:

- Amaan qab;
- Loola dhaqmo si asluub leh, tixgelin iyo xushmad;
- Aamin darenkaaga;
- Ku raac ama haku raacin dadka kale;
- In aad go'aan ka gaarto adeegyadaada iyo adeeg bixiyeyaashaada, iyada oo ku jaan go'aan xadka adeegyadaada;
- Weydii su'aal ilka aad ka fahanto;
- Bedel adeegyada xilli walba;
- Racfaan ka qaado go'aan walba oo ay gaaraan DHHS oo adiga ku saameynaya; iyo
- Xor ka ahaaw dayacaad iyo xadgudub.

Maxay yihiin masuuliyadeyda?

Waa in aad si firfircoon u hagtaa hannaanka qorshayntaada oo aad la xiriirto kooxdaada marka aad u baahantahay in lagaa caawiyo dhanka is-jihaynta. Marka mas'uulkaaga ama qooykaagu uu kaa caawiyo is-jihayn, kooxdaada ayaa kormeeraya danaha shakhsiga ee suurtagalka ah si loo hubiyo in danahaaga ay mudnaanta koowaad siiyaan xilliga go'aan qaadashada.

Waxaad aqbaleysa dhamaan masuuliyadda qofka loo shaqeeyo. Waxaa taasi ka mdi ah helitaanka, wareysiga, shaqaaleysiinta, tababaridda, jadwal gelinta, kormeerka, la socoshada iyo eryidda adeeg bixiyeyaashaada madaxa bannaan.

Adiga ayaa mas'uul ka ah maareynta isticmaalka lacagta miisaaniyadda sanadlaha ee shaqsiya ah (IBA):

- Waxaad ka gorgortamaysaa heerka saacaddiiba inta la siinaya mid kasta ee adeeg bixiyaha madax bannaan, ilaa heerka ugu sareeya;
- Waxaa khasab inaad la socota adeegyada lacagtoodal a bixiyay;
- Waa inaad soo sheegtaa walaac kasta oo la xiriira lacagaha la bixinayo SC-gaada;
- Noqo inaad diyaar u tahay inaad la shaqeyso SC-gaaga markii la helo in wax isku toosnayn; iyo
- Marka Medicaid ay bixineysa adeegga cafiska ee ku saleysan bulshada, ma bixin kartid lacag dheeraad ah oo ku saabsan adeegyadaaga cafiska ee hormarinta naafada.

Sideen ku doorana adeegyo iyo caawinaad?

Waa inaad baahidaada garataa, adiga oo ka fekeraya waxa aad dooneyso noloshada. Maxaay qaadan doona in arrimahaas ay dhacaan? Waa maxay taageerooyinka dabiiciga ah aad heysato? Taageerooyinka dabiiciga ah waa tusaale ahaan qoyska, saaxiibada, derisyada, kuwa aad wada shaqeeyaan, iyo adeegyada bulshada, kuwaas oo bilaash loo heli karo ama qiima jaban lagu heli karo. Waa inaad ka fakartaa baahida aysan dabooli karin kaalmadaada dabiiciga ah.

Kooxdaadu waxay ka hadli doonaan isla markana ay dukumentiyeen doonaan qorshe ay wax uga qabanayaan baahidaada. Waa in la ogaado oo laga hadlaa baahida caafimaadka iyo badbaadada. Marka baahiyaha caafimaad iyo badbaadada aanay dabooli karin adeeg bixiyaha madaxa bannaan, waxaa laga yaabaa inaad awoodin inaad is-jihayso.

Markaad aqoonsato baahidaada, SC-Kaaga wuxuu dib u eegis ku sameyn doonaa adeegyada cafiska DD-da ee la heli karo. SC-kaaga ayaa sidoo kale kugula talin karta adeegyo laga heli karo ee kheyraad kale. Adiga ayaa go'aaminaya adeegyada kaa caawinaya la kulankaada

yoolkaaga. Waxaa laga yaabaa inaad aqoonsatid adeegyo ka badan inta miisaaniyadaadu kuu ogolaato. Marka aadan buuxin karin dhammaan himilooyinkaaga, waxaad u baahan doontaa inaad go'aan ka gaarto hadafyada adiga kuu muhiim ah.

Markaad aqoonsato adeegyada aad u baahan tahay, SC-kaagu wuxuu kaa caawin karaa inaad go'aan ka gaarto sida iyo goorta adeegyadaas lagu bixinayo. Waa inaad qiimeysaa inta saacadood ee adeeg ah oo aad u baahan tahay maalin, todobaad iyo bil.

Waa maxay khataraha is-jihaynta?

Si aad ugu guuleysato waa in aad garataa khatarta dhici karta. Waa inaad go'aan ka gaartaa sida aad u dabooli karto baahidaada marka aynan wax sidii loogu qorsheeyay u socon. SC-gaaga waxaa lagu tababaraa adeegyada is-jihaynta ah waxayna kaa caawin karaan marka isbedel loo baahdo.

Halista Caafimaadka iyo Badbaadada

Ka fikir baahidaada caafimaad iyo badbaado. Waxa laga yaabaa inaad u baahato qof leh cilmi caafimaad ama tababar. Waxaa laga yaabaa in aad tababarto bixiyahaada madaxa banaan baahidaada caafimaadka iyo badbaadada, ama bixiyahaadu wuxuu u baahan karaa waxbarasho uu bixiyo qof xirfadle ah. Marka aad isu-jihayso adeegyadaada, caafimaadka iyo badbaadada ayaad mas'uul ka tahay.

Xadgudub iyo dayacaad

Marka aad gurigaada ku hesho adeegyo, waxaa laga yaabaa in lagu go'doomin karo islama ahaantaana lagu kali yeela oo aad u nugul tahay xadgudub ama dayacaad. Ha waaswaasin inaad sheegto cabasho ama eedeeyn. Waxa laga yaaba inaad aqoonsan xadgudub. Ha ka welwelin inaad lumiso bixiyaha madax banaan ama ka baqo in qof uu kaa waasho. Waxad u baahan tahay inaad u sheegto qof aad aaminto marka aad malaynayso in qof uu kugu xadgudbayo ama uu ku dayacayo.

Adeega bixiyaha iskuhalaynta

Waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato helitaanka adeeg bixiyaal madaxbannaan oo sidaad dooneyso u daboolo baahidaada. Adeeg bixiyahaaga madaxbannaan shaqada ayuu ka tagi kara ama ma imaan karo. Waxa muhiim ah inaad leedahay qorshe taxadar ah marka uu adeeg bixiyahaaga madaxbannaan uusan imaan sidii loogu talagalay. Qorshahaaga taxadarka waa inay ka mid noqdaan:

- Maxa dhacay marka uu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uusan imaan?
- Ma isticmaali karaan teleefan si aan qof oogu sheego? Yaan wacaya ama aan fariin u diraya?
- Ma u baahanahay Nidaamka Shakhsiyadeed ee Degdeg ah (PERS) si aan u helo caawimaad?
- Yaa diyaar noqon doona marka aan u baahanahay in aan caawinaad u yeerto? Ma waxaan haystaa liis dad ah oo aan wacayo haddii qofkii ugu horeeyay ee aan isku dayo uusan iga qaban?
- Ma leeyahay qoys ama saaxiibo ila caawin kara marka aan heli karin mid ka mid ah adeeg bixiyeyaasha madaxa banaan?

Marka aad la shaqeysid adeeg bixiyeyaasha madaxa bannaan, ma jiro "dhawr" shaqaale ah oo imaan kara marka adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan aan la heli karin. Waa xil adiga ku saaran inaad wixii arrimo ah ee ku saabsan sida adeegyada loo qorsheeyo loona bixiyay aad xaliso. Marka aadan awoodin inaad arrin xaliso, waad joojin karta isticmaalka adeeg bixiyaha madaxa banaan wakhti kasta, balse adiga ayaay kuu taala inaad hesho adeeg bixiye cusub.

SC-gaada ayaa caawinaad weydiin karta. SC-gaada ayaa laga yaaba inuu ogyahay adeeg bixiye kale oo madax banaan oo raadinaya saacado. Marka SC-gaagu ku siinayo magaca adeeg bixiyaha madaxa banaan, waad la xiriiri kartaa waanad waraysan kartaa si aad u ogaato inay awoodi karaan inay daboolaan baahidaada. Maadama uu qof uu u yahay adeeg bixiye madax banaan ee ka qaybgale kale macnaheedu maahan inuu kuu habbonyahay.

Ka waran hadaan u maleeyo in laygu xadgudbayo ama lai dayacay?

Marka adeeg bixiyahaaga uu kaa dhigayo inaad u dulqaadan karin, kala hadal qof sababta.

Xadgudubyada iyo dayaca waxaa laga yaabaa iney keeni karaan dhaawac jireed, xarig aan macquul ahayn, ciqaab takoorid, kufsi galmo, si xun looga faa'idaysto, ama diidmada adeegyada muhiimka ah. Xadgudub ama dayacaad ayaa waxay noqon kartaa mid ula kac ah ama mid ka dhalan karta taxadar la'an.

Marka aad u maleyneyso in laga yaabo inaad tahay dhibbane xadgudub ama dayacaad loo geystay, islamarkiiba qof u sheeg. Ha sugin ilaa aad ka dhaawacantid ama aad ka xanuunsantid. Markaad hubin, la hadal SC-kaaga, saaxib aad aamineyso ama xubin qoyskaaga ka tirsan.

SC-kaagu ayaa la socon doonaa adeegyadaaga cafiska Medicaid HCBS DD iyo gudbin doona wixii xadgudub ama dayacaad ah oo ay markaati ka yihiin. Waxaa laga yaabaa in SC-kaaga uu ku weydiiyo inaad dareensan tahay inaad u dul qaadan karin ama aan baahiyahaaga aan la daboolin. Daacad ahaaw oo ka hadal walaacyada aad qabtid. Adiga iyo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan waa khasab inaad kaqayb gashaan dib u eegista adeegyada.

Ma ahan inaad sugto inuu qof kale soo gudbiyo. Waxaad wici kartaa khadka xad gudubka/dayaca ama booliska xaafadaada marka aad isleedahay waxaa laga yaabaa inaad tahay dhibane xad gudub ama dayacid.

Tusaalooyinka xadgudubka iyo dayacaadda

Kuwa soo socda waa tusaalaha noocyada kala duwan ee xadgudubka iyo dayacaadda. Tusaalooyinkaani ma ahan kuwa loo wada dhan yahay, taas oo macnaheedu yahay in qofku uu kuugu xadgudbo ama uu ku dayacadeeyo adiga oo aan sameynin wax halkaan ku qoran. Mar kasta oo aad daremeyso inaad dul qaadin karin sida laguugula dhaqmay kala hadal qof aad ku kalsoon tahay.

Ciqaab daran: Waxaa ka dhasha xanuunka sabab u ah dhaqan aanan loo baahneyn.

Diiditaanka adeegyada muhiimka ah: In la xanibo helitaanka cunto ama biyo, dhar, hoy, iyo daaweyn loogu talagalay baahida jismiyeed.

Xadgudubka dareenka/afka: Hanjabaad, aflagaado, diiditaanka xaq u lahaanshaha muujinta rabitaanka iyo baahiyaha, xadgubidda internetka, ka soocida saaxiibada ama qoyska. Hay'adda badbaadinta adeegyada dadka waa wayn ma baaraan xadgudubka dareenka iyo afka, balse waa inaad u dulqaadan.

Ka faa'ideysi: Qaadashada lacag ama alaabo shakhsiyeed, oo aad ka dalbato saacado ka badan intii aad soo shaqeysay, iyadoo aadan dhameystireyn waajibaadka shaqo.

Dayacaad: Diidmada cuntada, dharka, hoyga, ama gaadiidka; bixinta kormeerka; aan bixinayn daawayn caafimaad.

Xadgudub jireed: Dhufasho, riixid, timo-jiidid, laadid, qaniinyo, daawooyin si xad dhaaf ahloo isticmaalo ama aan loo isticmaalin si wacan, iyadoo la adeegsanayo xakamayn.

Xadgudubka galmada: In lagu taabto siyaabo aad u dareento in aanad ku xasiloonaayn, hadallada galmada ama xubno lagu tuso waxyaabaha galmada ah ama qaybo jirka ka mid ah oo aadan dooneyn inaad aragto, Inuu kaa dhigo inaad taabato ama aad u hadashid si aadan ku qanacsaneen, sawiro qaawan inuu kaa qaado ama uu ku weydiiyo inaad sawiro qaaddo taasoo kaa dhigeysa in aadan ku qanacsaneen.

Xarig aan macquul ahayn: Isticmaalka kiimikada ama xannibaada jirka, u adeegsiga daawooyinka aan habboonayn, xarig been ah, is xakamayn ama afduub halis sare leh oo dhaawac jireed ah, adeegsi qasab ah.

Waa maxay masuuliyada kooxdaada ka saaran?

Kooxdaada waa inay taageeraan iyada oo loo marayo habka qorshaynta ku salaysan shakhsiga. Xubnaha kooxdaada kaa caawin kara qaybaha ugu badan ee is-jihada; kaliya waxaad u baahan tahay inaad weydiiso.

Xubnaha kooxdaada waa inay si joogto ah kaagala hadlaan adeegyadaada si ay u hubiyaan in baahiyahaaga la daboolayo. Kooxdu waxaa laga yaabaa inay isweydiiso haddii baahiyahaaga la daboolayo marka:

- Caafimaadkaaga ama xirfadaada hoos u dhaco;
- Adeegyada uma dhacayaan sida ku xusan qorshahaaga shakhsiga;
- Ma fahmin karti xilliga ficilada uu qaadayo adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan ay noqon karaan ficillo ama dayacaad;
- Aad diideysid adeegyada, adeegyada aad baajineyso, ama aadan guriggaada u ogoleyn adeeg bixiyahaaga;
- Ma amreysid ama ma kormeereysid adeeg bixiyahaaga madaxa banaan sida inaad u sheegin adeeg bixiyahaada marka aadan ku qanacsaneyn adeega, oo aadan tababarin adeeg bixiyahaada, adigoo aan waxa laga filanayo si fiican ugu sheegin; ama

**SOO GUDBI XADUGUBKA
IYO DAYCAADA:**

**Nambarka
Xadgudubka/Daycaada
24 saac – Nambarka-
Bilaashka ah (800) 652-1999**

**Ama la xiriir sharci fulinta
maxalliga ah**

- Aadaan raacayn qorshahaaga taxadarka marka loo baahdo.

Marka xubin ka tirsan kooxdaada uu ka welwelsan yahay baahidaada aan la daboolin, waxay kaala hadli doonaan walaaca jira. Marka aadan rabin inaad ka hadasho walaaca aad ka qabtid, qofku wuxuu la hadli doonaa SC-kaaga. Marka qorshahaaga looga baahdo isbeddel, waxaa la qabanayaa kulan kooxeed. Waa inaad diyaar u tahay inaad aqbasho warcelinta kooxdaada oo aad isbedel ku sameeyso markii loogu baahdo. Kooxdaada waa inaad dantaada ugu muhiimsan manaka ku haayan.

Helidda adeeg bixiye madax banaan.

Adiga ayaa masuul ah ah helidda adeegy bixiyahaaga. SC-kaaga ayaa kaa caawin kara geedi socodka. Waxaa laga yaaba inaad ogaadaan adeeg bixiye madax banaan oo raadinaya shaqo dheeraad ah. Waxaad sido kale caawinaad ka dalbani karta qoyskaaga ama meelo kale. Ma jirto liis ku saabsan adeeg bixiyaasha madaxa banaan.

Iyada oo aan la eegaynin sida aad ku heshay adeeg bixiyahaaga madaxa banaan, waa inaad wareysi ka qaada si aad u ogaato inaad daboolayaan baahiyahaaga. Maadama aad qof si fiican u taqaanid ama ay yihiin adeeg bixiyaha madaxbannaan ee ka qaybgalayaasha kale, macnaheedu maahan inay dabooli doonaan baahiyahaaga sida adeeg bixiyahaaga madaxbannaan.

Maxa kuu muhiim ah?

Waxaa ku caawinaya naad ka fikirto waxa adiga muhiimka kuu ah ka hor intaadan dooran adeeg bixiyaha madaxbanaan:

- Maxaan u baahanay in adeeg bixiyaha madaxa banaan uu ii sameeyo?
- Waa noocma qofka aan aaminayo si uu iila shaqeeyo?
- Adeeg bixiyaheyga madaxa banaan ma ubaahanyahay inuu yeesho xirfado gaar ah oo uu ku daboolo baahidayda?
- Sideen ku ogaanayaa haddii adeeg bixiyaha madaxbannaani leeyahay xirfadaha loo baahan yahay si uu adeegeyga u bixiyo?
- Ma u baahan doonaa adeeg bixiyeyaasha madax bannaan ee kala duwan si ay u daboolaan baahiyo kala duwan?
- Maxuu u baahan yahay adeeg bixiyaheyga madaxa banaan inuu iga ogaado si uu iigu taageero?
- Ma jiraan "waxyaaba" khasab ii ah aniga inuu lahaado adeeg bixiyaha? Tusaale ahaan, in luuqadda dhegooleyaasha si fiican u garanayso, adigoo ah qof aan sigaar cabin, ama isagoo haysta shatiga wadayaasha baabuurka.

Yaan shaqaaleysiin karaa?

Waxaad shaqaaleysiin karta qof walba sida adeeg bixiye madax banaan markuu qofka yahay:

- Waa inaad leedahay guud ahaan shurrudaha Medicaid HCBS DD cafis ka adeeg bixiyaha;
- Sharci ahaan adiga mas'uul kama timid; iyo
- Inaad la kulanto filashadaada.

Sida ugu fiican ee lagu heli karo adeeg bixiye madaxbannaani waa inaad tixgelisa dadka aad taqaanid oo ay ka mid yihiin saaxiibada, dariska, iyo qooyksaba. Markii aad weydiisid, qofku wuxuu noqon karaa adeeg bixiyahaaga. Uma baahnid inaad dooratid qof ka shaqeeya adeegyada bani'aadamka. U sheeg dadka aad raadinayso adeeg bixiyaha madaxbannaan iyo waxa aad u baahan tahay. Marka qofku uusan noqon karin adeeg bixiyahaaga, waxaa laga yaabaa inay garanayaan qof noqon kara adeeg bixiyahaaga.

Adeeg Bixiye madax banaan waa inuu:

- Inaad leedahay dhamaan shurrudaha Medicaid HCBS DD cafiska adeeg bixiyaha [Xeerka haggida DD](#), cutubka 7-aad;
- Buuxi dhammaan shuruudaha isdiiwaanglinta adeeg bixiyaha, oo laga helo [Sidee loo noqon lahaa adeeg bixiyaha Madaxbannaan](#), oo ay ku jiraan baaritaanada;
- Tababar ku leeyihiin goobaha soo socda iyo inay caddeymo ka bixiyaan marka laga codsado:
 - Xadgudub, dayacaad, iyo faa'idaysi iyo shuruudaha sharciga gudbinta gobolka iyo ka hortagga;
 - Dib u kicintawadnaha oo loo yaqaano CPR; iyo
 - Gargaarka degdega ee aasaasiga;
- Da'diisu tahay 19 ama ka weyn loo oggolaaday inaad ka shaqeeyso Maraykanka;

- Sharci ahaan mas'uuliyad kaama saarnaa: Si kale haddii loo dhigo, ha noqon waalidkaaga (caadi ah ama korsashada, markaad tahay qaan-gaar), xaaskiisa, mas'uulka, ilaaliyaha, ama awoodda qareenka;
- Kula noolaan ma aha marka aad bixineyso nasaasho, shirkadaha guriga, ama wax ka bedelka guriga;
- Aqbal qiimaha aad doorato;
- Heshiis la gasho Xafiiska Dhexe ee DDD;
- Inaad bixiso adeegyada sida ku cad qorshahaaga ee adiga kuugu salaynsan;
- Isticmaal Xaqiijinta Booqashada elektorooniga ah (EVV) ee adeegyada u baahan;
- Qaab elektoroonig ah u soo gudbi lacagaha ee saxda ah;
- Sahqo darooga aan lahayn; iyo
- U hoggansam shuruudaha HIPAA.

Si aad u bixiso adeegyada hormarka (tababar), adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani waa inuu haystaa:

- Shahaadada deegreega ama waxbarashada dhanka: cilmi nafsiga, shaqada bulshada, cilmiga bulshada, adeegyada bini'aadamka, waxbarashada, ama kuwa la xiriira;
- Afar ama in kabadan sano oo waayo-aragnimo xirfadeed ah oo ku saabsan bixinta adeegyada kobaca dadka qaba naafanimada horumarka ama ku jira qorista barnaamijka iyo barnaamijyada xog ururinta / falanqaynta;
- Afar sano ama ka badan oo waayo-aragnimo nololeed ah oo lagu taageerayo qofka qaba naafanimada horumarka; **ama**
- Isku-dhaf kasta oo waxbarasho iyo waayo-aragnimo ah oo la isku daray oo kor ku xusan isla markaana ah afar sano ama ka badan.

Sii uu kuu kaxeeyo, adeeg bixiyahaaga waa khasab:

- Ilaali caymiska ugu yar ee caymiska baabuurka ee uu u baahan yahay sharciga gobolka;
- Ma aysan haysan leesinka darawalnimada / leesinka baabur wadaha lagala laabtay saddexdii sano ee la soo dhaafay gudahood; iyo
- U Isitcmaal baaburkooda shakhsiga ee diiwaangashan markaad meel aadeyso.

Si aad u bixiso adeeg u baahan EVV, adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan waa inuu:

- Fahmaan shuruudaha EVV iyo bilasha, sida lagu qexay [Qalabka adeeg bixiyaha madaxbanaan](#);
- Hayso teleefan (kan casriga ah ama kompuuterka yar) si ay u isticmaalaan App-ka moobeelka ee EVV si elektaroonik ah si ay u galaan oo ay ooga baxaan; iyo
- Heli kara kumpuyuutar si uu helo nidaamka EVV ee lacag bixinta.

Faa'idadooyinka iyo qatarta suurtagalka ah markaad shaqaaleysiiso saaxiib ama xubin ka mid ah qoyska

Faa'idooyinka

Waay fududaan karta in la helo qof. Qofka horaba wuu kuu garana. Xadgudubka iyo daycaada. Waxa laga yaabaa in qofku ogaado waxa aad jeceshahay iyo waxa aadan jecleen. Xiriiak shakhsiga ayaa dhaawacmi kara.

Qatarta

Waay adkaan karta inaad qof shaqada ka erido. Waay adkaan karta inaad dhaleeceyso ama aad gudbiso

Sideen ku hela adeeg bixiye madaxbanaan?

Marka aadan aqoon qof noqon kara adeeg bixiyahaaga madaxbanaan, waxaa laga yaabaa inaad aqoon meel aad ka raadin karto. Ka bilow kooxaha u doodista maxalliga ee dadka. La hadal dugsiyada maxalliga ah, sida waxbarashada dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama koleejyada maxalliga. SC-gaada waxaa uu kuugu toosin kara goobaha aad macluumaad ka heli karto ee bulshadaada.

Waxaad isticmaali kartaa macluumaadka gobolka oo dhan:

- [Macluumaadka Nebraska iyo Nidaamka Gudbinta \(NRRS\)](#) waa kaydka xogta wakaaladaha iyo adeeg bixiyayaasha.
- [Nebraska 211](#) waxa ay taxdaa macluumaadka ku saabsan wakaaladaha iyo adeeg bixiyayaasha Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha.

Waxaad dooran kartaa inaad ku xayeysiiso joornalada, bogagga shabakadaha shaqada ama bogagga shabakadaha dadka lagu caawiyo. Tusaale ahaan "Waxa la doonaya qof aan sigaar-cabin si aad qof naafa ah daryeel u siisid guriga uu qofku degan yahay biishiiba hal mar oo ah maalmaha sabitda iyo axada. Wac Sue inta 5-ta iyo 9-ka galabnimo namabarka 123-555-4567." Ama, "Waxaa la doonayaa: Dumar inay barto qofka qabaa

xirfadaha daryeelka dadka naafada ah iyo nadaafadda guriga. Saacadaha iyo maamlaha waakuwa la badeli karo; ila 20 saacadood bishiiba. Ka wac Mark nambarka 123-555-3456. "Aada masuul ak ah lacag walba oo xayasiin ah.

In la helo qof doonaya inuu noqdo adeeg bixiyahaaga madaxbanaan waa uun talaabada koowaad. Waxaad mas'uul ka tahay inaad xaqiijiso inaad baahidaada buuxiso oo aad siiso adeegyada cafiska aad doorato ee DD Medicaid HCBS.

Sideen ku dooran karaa adeeg bixiye madax banaan?

Waxaa muhiim ah inaad la kulanto oo aad wareysato adeeg bixiyaha madax banaan ee suurtagal ah ka hor intaadan weydiisanin inay bixiyaan adeegyada cafiska Medicaid HCBS DD. Adiga oo keliya ayaa ogaan doona marka aad qofku aad raalli ka tahay oo wax dhiba ku qabin. Xafiiska Dhexe ee DDD ayaa masuul ka ah inuu heshiis la sameeyo adeeg bixiyaha madaxa banaan, balse adigaa masuul ka ah inaad go'aansato haddii uu adeeg bixiyahaagu kuugu habboon yahay.

Marka aadan mas'uul ka aheyn inaad shaqaaleysid, waxay u ekaan kartaa hawl weyn oo kale. Waa shaqo muhiim ah, si aad u heysid qof aad ku kalsoon tahay oo aad ku kalsoon tahay inuu gacan ka geysto geedi socodka. Xita marka aad heysato caawinaada qof kale, adiga ayaa hormuud ka ah oo masuul ah.

Samaynta faahfaahinta shaqo

Ka fakar waxa aad ka filaneyso adeeg bixiyahaaga madaxa banaan oo cadee filashooyinkaas. Waa inaad qeexda adeegyada cafiska ee HCBS DD ee aad dooraneyso. Waa inaad sheegta maalmaha todobaadka iyo saacadaha aad dooneyso. Waa inaad sheegta waxa aad ka damacsantahay xiriirkaaga shaqo. Waa inaad macluumaadkan ku dhejisaa sharaxaadka qoraalka shaqada si aad u siiso adeeg bixiyahaaga suurtagalka ah.

Sharaxaadka shaqada waa inaad ku dartaa waxyaabaha aad fileyso, sida:

- Adeegyada cafiska ee Medicaid HCBS DD, lacagta iyo jadwalka aad rabto;
- Shuruudaha bixiyaha adeegyada aad doorato;
- Liiska waxa aad dooneyso inaad barato;
- Liiska waxa aad dooneyso in laga caawiyo;
- Filashada aad ka qabto adeeg bixiyahaaga madaxa banaan inuu yimaado uuna ku yimaado wakhtigii shaqada;
- Ogaysiis intee la 'eg ayaad u baahantahay, markii uu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uusan shaqayn karin sabab la xiriira xanuun ama ballanqaadyo kale dartood;
- U baahan shaqooyin jireed, sida wax qaadid;
- Xeerka aad gurigaaga ku leedahay; iyo
- Doorbidkaaga shakhsiyeed, sida sigaar cabista la ogolayn, isticmaalka taleefanka gacanta oo aan la ogolayn, ama aanad keenin xayawaanka la xanaaneysto.

Baaritaanka teleefanka

Ka hor inta aadan la kulmin adeeg bixiye madax banaan, telefoonka kula hadal. U sharax baahidaada, shuruudaha shaqada, waxyaabaha aad ka fileyso, mushaarka aad bixineyso iyo saacadaha. Weydii inay jiraan hawlo ay qaban karaan ama aanay qaban karin. Weydii inay leeyihiin dhamaan shuruudaha. Iyada ku sleysan wicitaanka, go'aami inaad dooneyso inaad sameeyso wareysi toos ah.

Jadwal u sameynta wareysiga

Go'aami halka aad ku sameyneyso wareysigaaga tooska ah:

- Waxaad yeeli karta in qofka imaado gurigaaga. Waxaa laga yaabaa inaad ku qanasan tahay in wareysiga lagu sameeyo gurigaada qofkana ad tusi kartid in qalabka la-qabsashada ah. Marka uu qofku ka shaqeynayo gurigaaga, waxey arrintan u ogolaaneysaa inay arkaan deegaanka. Marka aad wareysi kusameeyso gurigaaga, qofku wuxuu ogaanayaa meesha aad degan tahay xitaa marka aadan shaqaaleysiin.
- Waxaad ku kulmi kartaan meel fagaare ah si uusan qofka u soo galin gurigaaga. Markaad ku kulmeysaan goob fagaara ah, waa inaad ka digtoonaata inaad wadaagta macluumaad khaas ama qarsoodi ah adigoo joogo goob fagaare ah. Marka aad ku kulmeyso makhaayad, ka fikir haddii aad ogoshahay geesaha aamusan ama ku dhex jira miisaska buuqa codka dheer.

Iyadoo aan loo eegin meesha aad go'aansato inaad ku sameysa wareysiga, waxaa laga yaabaa inay mid wanaagsan tahay in saaxiib, xubin qoyskaaga ka tirsan, ama ay ka soo qayb galaan SC-gaadu. Tani waxay kaa caawin kartaa inaad dareento ammaan iyo degenaansha badan. Marka aad qof kale u soo xaadiro, waxay bixin karaan aragti dibadda ah oo ku saabsan is dhexgalka adiga iyo adeeg bixiyaha madaxbanaan ee suurtagalka ah inuu kuu sahqeeyo. Waxaa kale oo uu qofku fikir labaad kaaga dhiiban karaa inuu qofku awoodo inuu baahidaada daboolo.

Waqti iyo goob u ballanso wareysiga oo ay go'aan ka gaaraan qaab aad iskula xiriiri karto marka midkiin uusan waqtiga loo qaban karin. Markii aad jadwalka siinayso wareysiyo aad la yeelanayso wax ka badan hal qof oo adeeg bixiyayaal madax bannaan, u ogolow wakhti ku filan inta u dhaxaysa wareysi kasta iyo inta u dhaxaysa inta u dhaxaysa waraaqaha, oo ka feker, waxa aad maqashay iyo waxa aad aragtay. Wakhtigaag qaado oo ahaaw mid isku toosan.

U diyaar garowga wareysiga

Heyso liiska su'aalaha aad weydiin lahayd ee ku saabsan qofka taarikhdiida iyo waayo aragnimadisa. Su'aalaha waa inaay ahaadaan kuwa u muhiim ah shaqada. Isla fiiriya su'aalaha qofka kaa caawin doono wareysiga. Waxaad weydiisan kartaa qofka inuu soo qoro jawaabta adeeg bixiyaha madaxa banaan ee suurtagalka ah si lagaaga caawiyo inaad xasuusatiid oo aad dib ugu laabatid. Marka aad waraysato in ka badan hal adeeg bixiye madax banaan oo suurtagal ah, way adkaan kartaa in la xasuusto cidda sheegtay waxa la sheegay.

Su'aalaha wareysiga ee suurtagalka ah:

- Maxay ahayd shaqadii hore ee aad qabatay?
- Shaqadaadi hore sideey kuugu diyaarisay shaqadaan?
- Maxay tahay waayo aragnimada aad qabtid ee ku saabsan inaad la shaqeysay dadka naafada?
- Waaya aragnimadii kale ee aad usoo martay si aad shaqadan kuugu diyaargariso, sida iskaa wax u qabso ama waxbarasho?
- Ma lagu ansixiyay CPR iyo gargaarka degdegga ee aasaasiga ah?
- Ma fahamsan tahay waxa la dhihi karo ka xadgudub, dayacaad iyo faa'iideysi?
- Ma ogtahay waajibaadka la xiriira tacaddiyada, dayacaad iyo ka faa'iideysiga iyo ka hortagga faa'iidada iyo soo gudbinta?
- Ma qabtaa wax su'aalo ah oo ku saabsan waajibaadka shaqada ama jadwalka shaqada?
- Ma jiraan sabab aadan u gudan karin waajibaadka shaqo?
- Ma jiraan sabab aad u dabooli kari wayday filashadeeda ama qalabka "waa in aad haysato"?
- Sideed ku xallin kartaa wixii dhibaato ama khilaaf ah? Sheeg tusaalooyinka xaaladaha shaqooyinka kale.
- Ma jirtay wakhtiyo lagaa rabay iaad shaqayso, laakiin aad awoodi wayday inaad soo muuqato ama aad soo daahdo?
 - Maxaad u iman weyday?
 - Sideed ku ogeysiisay maamulaha shaqada?
- Ma leedahay gaadiid laisku halayn karo oo shaqada aad ku timaadid? Marka uu adeeg bixiyahaaga madax bannaani doonayo inuu baabuur kuugu wado, kala hadal macluumaadka.
- Maxaad u dooneysa inaad noqotis adeeg bixiyaheyga?
- Shaqo kale ma leedahay? Qof kale miyaa adeeg bixiye madax banaan u tahay?

Samaynta wareysiga

Adiga ayaay kuugu xirantahay inaad hogganka u qabato wareysiga. Qoqfka wuxuu codsiga u gudbinaya inuu adiga kuu shaqeeyo? Waxaad heli kartaa xubin qoyska ka mid ah, saaxiib, ama SC oo kula socda si uu kuu caawiyo, ama taageero kaliya kuu siiso.

Ku bilow wareysiga adigoo sharraxaya fursada, jadwalka, iyo waajibaadka saaran. Sii qofka sharraxaad shaqo oo qoraal ah oo aad sameysay. Sharaxaad ka bixi wax kasta oo dhaqdhaqaaqyo jireed oo aad u baahan tahay, sida in kor wax loo qaado. Dib u eeg filashadaada ka qeybgalka iyo imaanshaha wakhtiga saxda ah. Faahfaahi inta ay dhantahay ogeysiiska aad u baahan tahay, markii adeeg bixiyahaada madaxa bannaani uusan shaqayn karin xanuun ama ballanqaadyo kale dartood. Weydii inuu qofku awoodo oo uu doonayo inuu shaqada qabto iyo in kale. Haday jawaabta maya tahay, u mahadceli oo soo ajfar wareysiga.

Weydii su'aalaha aad diyaarisay. Adiga ama qofkii ku caawinaya waa inaad qoraallo ka qortaan jawaabaha. Tani waxay caawin doontaa hadhow in la go'aansadaa sida wareysigu u dhacay.

Wareysiga dhamaadka weydii tixraacyo shakhsi ah ama inaad tixraacyo ka soo qaadata shaqooyinkii hore. Tixraacyada maahan khasab, laakiin waa lagugula talinayaa.

Su'aalaha aadan weydiinayn iyo kuwa bedel u noqon kara

Waxa jira su'aalo aadan weydin karin. Waa kuwa takoor ah ama si kale aan munaasab ahayn.

➤ **Qaranka ka soo jeedo/ Dhalashada**

- *Ha weydiin:* Muwaadin ma tahay? Xagee adiga ama waalidkaagu ku dhasheen? Muxuu yahay afkaaga hooyo?
- *Taa bedelkeed weydii:* Ma laguu ogolaaday inaad ka shaqeyso Mareykanka? Aad ma u taqaana luuqada aan isticmaalo?

➤ **Da'da**

- *Ha weydiin:* Imisa jira tahay? Waa maxay taariikhda dhalashadaada? Gormaad dugsiga sare ama koleejka ka qalin jabisay?
- *Taa bedelkeed weydii:* Ma 19-sano jir ayaa tahay mise waad ka wayntahay? Tani waa da'da ugu yar ee loogu baahan yahay adeeg bixiyaha madax banaan.

➤ **Guurka/qoyska**

- *Ha weydiin:* Ma guursatay? Yaad la nooshahay? Ma qorsheyneysa inaad qoys sameysato? Imisa ciyaala leedahay? Maxey yihiin qabanqaabada daryeelka caruurta?
- *Taa bedelkeed weydii:* Jadwalka ay shaqadan u qabaneyso ayaa laga yaabaa inuu isbeddelo waxaana laga yaabaa inaysan isku mid ahan ka todobaad ka todobaad. Ma rabaaneysa inaad ku shaqeyso jadwal beddelayo? Su'aashan waa mid la aqbali karo haddii kuwa soo codsaday oo dhan la weydiinayo.

➤ **Shakhsi**

- *Ha weydiin:* Muxuu yahay dheerirkaaga? Imisa weeye culayskaaga?
- *Taa bedelkeed weydii:* Ma awoodi karta inaad qaado "tirada" cabirka culayska? Ma caawin kartaa wareejinta kursiga naafada?

➤ **Naafada**

- *Ha weydiin:* Ma leedahay wax naafanimo ah ama cuduro caafimaad? Maxay tahay taariikhda caafimaadkaaga? Waa sidee caafimaadka qoyskaaga?
- *Taa bedelkeed weydii:* Ma awoodi karta inaad qabato masuuliyadda shaqada? Su'aashani waa caadi haddii aad si dhameystiran u sharaxdo shuruudaha shaqada.

➤ **Taariikhda Xiritanka**

- *Ha weydiin:* Ma lagu xiray?
- Uma baahnid inaad taariikhdan weydiiso. Inta lagu guda jiro hawsha isdiwaangelinta adeeg bixiyeyaasha (Medicaid), waxaa la dhameystirayaa taariikhda xadgudubka / dayacaadda iyo taariikhda dembiyada.

Ha u balanqaadin adeeg bixiyaha madax bannaan in la shaqaaleysiinayo. Go'aanka kama dambaysta ah lama gaari karo ilaa inta isdiwaangelintu uu dhameystiranyo. Waa inaad sheegtaa in qofka DD-da uusan adeegyada cafiska la bixin karin ilaa inta ay ka buuxsanto isdiwaangelinta adeeg bixiyaha islamarkaasna la buuxinayo ogolaanshaha adeeg.

Hubinta Tixraacyada

Wareysiga ka dib, fiiri tixraacyada lagu siiyay. Waad la dhici doonta waxa aad barato.

- *Waxaad weydiin karta dadkii hore ee loo shaqeynaye:* Qofkan mar kale mashaqaaleysiine? Ma qofku ma aamini jiray? Miyuu qofku ku jiray wakhtigii loogu tala galay oo lagu kalsoonaan karaa soo dhameystirka shaqada loo baahan yahay? Marka loo baahdo, qofkani ma doonayaa inuu u dabacsanaado jadwalka ama waajibaadka shaqo? Qiyaasta 1 ila 10, sidee baad u qiimeyn lahaa aaminaaddaada qofkan?
- *Waxaad weydiin karta tixraacyo shakhsiyeed:* Mudda intee la eg ayaad qofkani taqaana? Muxuu yahay xiriirka aad la leedahay qofkan? Ma dareensan tahay in qofkan leeyahay xirfadaha lagama maarmaanka u ah shaqadan?

Go'aan gaarida

Dareenkaaga aamin. Ha dooran qof aadan u arkaynin inuu kuu cuntamayo. Marka aad u malaynayso in qof uusan ahayn mid ku habbon inuu kula shaqeyso, waxaa jira sababo fiican oo ku saabsan sida aad dareemeyso.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad shaqaaleysiisato wax ka badan hal adeeg bixiyaal oo madaxbannaan. Adeeg bixiyaha kasta oo madax bannaan waa inaad ku caddahay filashadaada iyo jadwalkooda. Waxaa laga yaabaa inaad doonaysid inaad aqoonsato adeeg bixiyaha madaxbannaan oo aad heli karto hadii aad u baahato. Weydii in adeeg bixiyahaada madaxa bannaani uu diyaar u yahay inuu shaqeyso marka loo baahdo ama haddii ay xaalad degdeg ah dhacdo. Ha ogollaan in adeeg bixiye madax bannaan oo wanagsan inuu kaa baxsado. Tani waxay badbaadin kartaa wakhti aad raadinayo adeeg bixiye madax bannaan goor dambe.

Markaad bilowdid adeeg bixiyaha cusub ee madaxa bannaan, hubso inaad leedahay qorshaha lagu aad ku heleyso qof kale ilaa aad ka habsaneyso inay yihiin kuwa la isku halayn karo. Marka uu adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan soo imaan waayo ama uusan ku soo wacin, qof kale shaqaaleysii! Habdhaqankani inta badan isma bedelo.

Ha niyad jabin markaad shaqaaleysiiso adeeg bixiyaha madax bannaan, isla markana uusan ahayn kii aad rabtay. Waa inaad aaminsan tahay adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan oo aad dareentaa degenaan. Waxaa laga yaabaa inaad tijaabiso dhowr adeeg bixiyeyaal kala duwan oo madaxbannaan intaadan helin midka aad rabto. Dul qaad muuji. Waad heli doonta adeeg bixiyaha madaxa bannaan ee aad rabto.

Sideen adeeg bixiyaheyga madax bannaan ooga dhigaya in loo ogolaaday inuu shaqada bilaabo?

Markii aad rabtid inaad shaqaaleysiiso qof, u sheeg inaad la soo xiriireyso. Weydii marka diyaar u yihiin inay bilaabaan. U sheeg in haddii la xusho aad ballan u sameyneysid warqadaha loo baahan yahay, baaritaanka taariikhda shakhsiga iyo heshiiska adeeg bixiyaha. SC-gaadu ayaa kaa caawin doona waraaqaha.

U sheeg SC-gaaga inaad doonaysid inaad shaqaalayso adeeg bixiye madax bannaan. SC-gaaga ayaa adiga iyo, qofka idinka, caawin doona geedi socodka. DDD ayaa kaa caawin doonta adiga iyoadeeg bixiyahaaga madaxa bannaan inaad fahamtaan mudada uu habka shaqaaleysiintu qaadan karo. Waxaad u baahan tahay qorshe aad baahiyahaaga u buuxiso ilaa uu bilaabayo adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan.

Marka aan horay loo diiwaan gelinin adeeg bixiyahaaga si uu u bixiyo adeegyo, SC-gaaga ayaa ku siinaysa baakadka isqorista ee adeeg bixiyaha madaxa bannaan. Waxaad baakadda u dhiibeysaa adeeg bixiyahaaga madaxbannaan ee suurtagalka ah. Adeeg bixiyahaadu waa inuu dhammeystiro habka is-qorida. Adeeg bixiyahaaga ayaa buuxin doona qaybtooda oo ka mid ah xirmooyinka isdiiwaangelinta una diro SC-gaaga. SC-gaaga ayaa buuxin doona macluumaad dheeraad ah waxayna baakadda u diri doontaa Xafiiska Dhexe ee DD. Geedi socodka waxa loo faahfaahiyay [Sida loo noqonaya adeeg bixiye madax bannaan](#).

DDD ayaa kuu soo sheegi doonta goorta uu hawshu dhamaystiran yahay iyo in la ansixiyo adeeg bixiyahaaga.

Ma tababara adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan

DHHS ma tababartaa adeeg bixiyaheyga madaxa bannaan?

DDD ayaa waxaay bixisa tababaro. Waa inaad ku dhiirigelisaa adeeg bixiyahaada madaxa bannaan inuu soo xaadiriyo. Qof kasta oo daneynaya waxaa tababarro u bannaan. Adiga iyo adeeg bixiyahaaga madax bannaan ayaa aad wada tagi kartaan tababarka! Tababaro badan waa bilaash. Marka uu jiro qarash, bixiyahaada madaxa bannaan ayaa u baahan inuu bixiyo. Waxbarashada lagama siin karo mushaar ka imaanaya IBA-daada, kumana bixin kartid bixiyahaada madaxa bannaan in uu ka qeyb galo waxbarashada. Fadlan ka fiiri DDD [bogga tababarka](#) wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tababarka.

Maxaan ugu baahanahay inaan tababaro adeeg bixiyaheyga madaxbannaan?

Adiga ayaa mas'uul ka ah inuu xaqiijiyo in bixiyahaada madaxa bannaan uu helo waxbarasho ku filan oo ku dabooleysa baahidaada. Waxbarashadu waxay u fududeyneysaa in bixiyahaada madaxa bannaan uu ogaado sida aad dooneyso in wax loo qabto. Sababtoo ah qof khibrad u leeyahay ama ku yaqaano micnaheedu maahan in ay yaqaaniin sida ay kuugu shaqeyaan. Waa inaad bixisaa filasho cad ah.

Muxuu tababarku uu ka mid yahay?

Waa inaad samaysaa liista hubinta si aad ula socoto markaad tababarto adeeg bixiyahaaga madaxa banaan iyo waxa la xiriiira mowduucyada. Dhibaatooyin badan oo ka dhexeeya shaqa-bixiyaha iyo shaqaalaha waxaa sabab u ah tababar la'aanta ama isgaarsiin la'aanta oo liidata. U ogolaada fursadaha adeeg bixiyahaada fursadda inay su'aalo ku weydiyaan. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad weydiiso inay jiraan wax aad ku caawin karto inay sameeyaan ama wax bartaan. Markaad shaqaalaysid wax ka badan hal adeeg bixiye oo madax banaan, u hay liiska hubinta bixiyaha kasta oo madax banaan.

Tababarka shaqada adeeg bixiyaha madaxa banaan

DDD waxay sameysa hordhaca adeeg bixiyaha madaxbannaan bil kasta. Tababarka shaqada waxaa loogu talagalay mustaqbalka, cusub, iyo adeeg bixiyeyaasha hadda madax banaan. Waxaa sidoo kale ka qeyb gali kara ka qaybgalayaasha oo isticmaalaya bixiyeyaal madaxbanaan iyo mas'uuliyiintooda.

Waxyaabaha ku xusan tababarka shaqada:

- Macluumaadka guud iyo shuruudaha muhiimka ah ee adeeg bixiyeyaasha madaxa bannaan;
- Adeegyada DD iyo shuruudaha gaarka ah;
- Gudbinta adeeg bixiyaha madaxa banaan iyo Isdiiwaangelinta;
- Adeeg bixinta; iyo
- Xuquuqda ka-qaybgalayaasha iyo qorshaha qofka ku slaaysan

Tababarka shaqada looma baahna in la helo, laakiin si heer sare ah ayaa laguugula talinayaa waxayna bixisaa macluumaad qiimo leh ee loo baahan yahay si shaqada loo qabto.

Shuruudaha shaqada

Waxaa haboon inaad keento faahfahinta qoraalka shaqada waxad ka filaneyso. Si dhameystiran u qeex waxa aad rabto inay dhacaan maalin walba ama toddobaad kasta. Maka adeeg la siinayo gurigaaga, Samee booqasho aad iyo dib u eegis la xiriiira "xeerarka." gurigaaga

Ka hadal muhiimadda ay leedahay in shaqada wakhtigeeda lagu tago. U sheeg adeeg bixiyahaaga madax banaan sida iyo goorta ay tahay in ay kuu soo sheegaan marka aysan imaan karin shaqada ama ay soo daahaan.

Markii aad dooneysid inaad wakhti la qaadato qoyska ama asxaabta adeeg bixiyahaada madaxa banaan, waa in adeeg bixiyahaagu kula joogaa. Marka aad jeceshahay in guriga adeeg bixiyahaaga madax banaan aad ku nasatid ama la keli noqoneyso qoyskooda ama saaxiibadooda, dadka waaweyn waxay u baahan yihiin inay baariitanka taariikh-dooda la sameeyo ka hor inta aysan dhicin. Adeeg bixiyahaada madaxa bannaani yuusan keenin carruurta aan qaangaarka ahayn, marka ay shaqaysanayaan; Ma dabooli karaan baahidaada inta ay dadka kale u baahanyihiin. SC-gaaga ayaa kaa caawin kara inaad fahamto farqiga u dhexeeya bixiyaha lacag bixiyaha ah iyo saaxiib.

Barnaamijka kobaca

Adeeg bixiyaha madax banaan ayaa looga baahan yahay inuu barto sida loo qoro qorshayaasha habdhaqanka ah si uu u bixiyo adeeg kasta oo kobaca ah. Adeeg bixiyahaaga ayaa laga yaaba inuu waayo aragnimo u leeyahay. Tababarka looma baahna ka hor inta aanu dhamaynin is-diiwaangelinta adeeg bixiyaha. Marka bixiyahaaga madax bannaani uu u baahan yahay tababarka barnaamijka kobaca (habilitation training) si uu u qoro una hirgeliyo barnaamijyada, waxaa bilaash looga heli karaa DDD.

Dookha shakhsiga

U sheeg adeeg bixiyahaaga madaxa banaan waxa aad u maleyneyso inay adeeg bixiyaha ka dhigaya mid wanagsan.

U sheeg adeeg bixiyahaaga madaxa banaan waxa "ku dhibaya." Tusaale ahaan inaan lagu darin go'aanada, dadka adiga kaa hadlayaan halkii ay kula hadli lahaayeen ama isticmaalka telefoonka gacanta. Waxaad u sheegi kartaa adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan in uusan ku hadlin, qoraal sameynin, ama uu ku ciyaarin taleefoonkooda gacanta maadama lacag lagu siinayo shaqada.

Marka adiga iyo adeeg bixiyahaada madaxa bannaani ay tagayaan goobaha, ka wada hadla bixinta raashinka iyo kharashka galitaanka munaasabadaha. Marka aad rabto inaad meel aaddo sida filim, adeeg bixiyahaaga madaxa banaan ma tagi karo mana awoodi karo inuu tago oo iska bixiyo, adeeg bixiyahaaga madaxbanaan waad ka bixin karta tikidka. Ma u celin kartid adeeg bixiyahaaga madax bannaan waxa ay iibsadeen. Adeeg bixiyahaaga madaxa banaan yuusan ku weydiin inaad wax u soo iibiso. Markaad u maleyneyso in adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu adiga kaa faa'ideysanayo, tixraac qeybta dhanka xadgudubka iyo dayacaad.

Xaaladahah degdega ah

Ubadi in xaalad degdeg ah aysan marnaba dhici doonin, laakin waa muhiim in loo diyaar garoobo si qof walba si dhaqso oo deganaansho ah uu u tallabo qaado. Waxaa xil adiga ku saaran inaad hubiso in adeeg bixiyahaaga madaxbanaan loo tababaro inuu qabto xaaladaha degdega ah. Xaaladaha degdega ah waxa ka mid dab, fatahaad, iyo cimillo daran. Waa inaad ka wadhadashaan qorshaha inta lagu jiro isbuuca ugu horreeya ee shaqada dib u eegisna aad sameysaan haddii loo baahdo. Marka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uusan kula joogin xilliga xaaladaha degdega ah, ma wici karta si ay kuu caawiyaan?

Marka aad haysato aaladda dab damiska, kuwa qiiqa aqoonsanaya ama qalabka kale ee degdega ah, hubi in qalabkaasi uu shaqeynayo, islamarkaasna adeeg bixiyahaada madaxa bannaani uu ogyahay meesha ay ku yaalan iyo isticmaalkooda. Tus adeeg bixiyahaada madaxa banaan wadooyinka daadgureynta marka uu dab kaco. Marka aad degan tahay guri dabaq ah, tus adeeg bixiyahaada madaxa banaan, halka aad ka heli karto alamka dabka.

Ka hadal qorshahaaga ku aadan cimillada daran iyo fatahaadda. Marka aad haysatid xirmada duufanada, tooshiyo, ama waxyaabo kale oo aad u baahato xaalad degdeg ah, adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani waa inuu ogaado meesha ay ku sugan yihiin iyo sida loo isticmaalayo. Maxad fileysa inuu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan inuu kula sameeyo marka ay jiraan cimilla degdega?

Marka aadan laheyn qorshe degdega ah, dabdamiska ama xirmooyinka duufanada, waxaa laga yaabaa in tani ay tahay wax uu kugu caawin karo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan. Adiga ayaa mas'uul ka ah qorshahaaga, adeeg laakiin bixiyahaaga madaxa bannaan ayaa kaa caawinaya inaad go'aan ka gaarto waxyaabaha aad u baahan tahay ee badbaadada ah, halka aad ku hayn kartid, iyo haddii aad u baahato inaad jadowalka ku hubiso alaabta sida batariyada.

Baahida caafimaad: Caafimaad iyo badqab

Dib u eegi ku samee baahiyaahaga caafimaad, oo ay ka mid yihiin xaalada caafimaad, daawooyinka aad qaadata, iyo xasaasiyadda. Sharax waxa ay u egtahay xaalad caafimaad oo degdeg ah iyo sida aad ka rajaynayso in adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani uu fal celiyo. Tababar adeeg bixiyahaaga madaxa banaan si uu si fiican uga fal celiyo xaalad kasta oo caafimaad oo horseedi kara xaalado caafimaad oo degdeg ah, sida sonkorowga ama xanuunka qalalka. Xaqiiji in adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu ogyahay sida ay ugu jawaabi karaan xaalad caafimaad oo degdeg ah.

Heyso liiska nambarada degdega ah. Adiga iyo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan dib u eegis ku sameeya oo xaqiiji inay ogyihiin halka laga helayo. Marka adiga iyo adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani uu bulshada dhex joogo, waxaa haboon inaad keento macluumaadka caafimaad iyo tan degdeg ah, haddii ay xaaladu degdeg ka timaado.

Markaad dooratid in aadan la wadaagin macluumaadka caafimaadka, adeeg bixiyahaaga madaxa banaan kuma qabsan kartid marka ay jirto xaalad caafimaad oo degdeg ah. Waxaa haboon inaad macluumaadada caafimaadka kala hadasho adeeg bixiyahaada si ay xaalladaada ugala soo noqdaan jawaabo ku haboon marka ay xaaladu timaado.

Baahiyaha caafimaad: Awaamiirta heerka sare

Awaamiirta heer sare ah waa waraaqo sharci oo kaa caawinaysa inaad qoyskaada, saaxiibadaada iyo adeeg bixiyeyaashaada u sheegto rajooyinkaaga daryeelka dhamaadka nolosha. Adeegyada awaamiirta heerka sare ah laguguma daro cafiska Medicaid HCBS DD, laakiin waa inaad adeeg sheegtaa bixiyahaaga madax banaan macluumaad ku saabsan wixii awaamiir horumarin ah oo aad haysato si ay sameeyaan sidaad rabto xilliga xaaladahan.

Dardaaranka nolosha: Dardaaranka nolosha waxay dadka u sheegeysa inay ogaadaan rabitaankaaga daryeelka dhamaadka nolosha marka aadan sheegi karin go'aanadaada. Waad dooran kartaa inaad bilowdo ama aad sii wadato daaweyn joogto ah.

Ku dhawaaqida Dib u soo noolaynta (DNR): Dib u soo noolaynta (DNR) ayaa sheegaya kuwa kale inaad rabin in qofna uu isku dayo inuu ku soo nooleeyo marka aad joojiso neefsashada ama marka wadnahaagu istaago. CPR lama sameynayo marlaad heysatid DNR.

Awoodda raageysa ee qareenka u xilsaaran daryeelka caafimaadka (DPOA-HC): Awoodda raageysa ee qareenka u xilsaaran daryeelka caafimaadka ayaa magaciisa ku siinaya qof kale oo kuu go'aamaya go'aanada daryeelka caafimaadka haddii aadan awoodin. Waxa jira noocya kala duwan oo ah awooda qareenka, balse tani waxay diirada saareysa baahida aad u qabtid inaad hesho caawinaad la xiriirta go'aanada caafimaadka. Waa inaad doorata qof raacaya rabitaankaaga.

Kormeeridda adeeg bixiyaheyga madaxa banaan

Adeeg bixiyaha madaxa banaan oo ku faraxsan wuxuu qaban doonaa shaqo ka wanaagsan adiga la shaqaynta. Ku faraxsanaanta ma ahan oo kaliya xaalad mushahar cadaalad ah iyo xaalad shaqo. Ku dhiirigeli adeeg bixiyahaada madaxa banaan inuu si weyn ugu faano shaqadiisa. Tani waay fududahay marka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu rumaysanyahay inaad qiimaynayso shakhsi ahaan.

Amaan adeeg bixiyahaaga madaxa banaan markay wax si fiican u qabtaan. Inaad is xishmeysaan aad ayaay muhiim u tahay markaad si dhaw isula shaqeysaan. Falcelinta fiican waa mid ah siyaabaha aad xishmad u tusi karto.

Mararka qaar waxaad u baahnaani inaad bixiso falcein aan wanagsaneen. Tani maahan falcein xun, balse waa falcelin wax ku ool ah. Falcelin ka bixi hadii aad aragto waxa aadan rabin. Marka aad sugto, adeeg bixiyahaaga madaxa banaan ayaa laga yaabaa inuu ka yeesho caadooyin. Noqo mid toos ah kala dhig dhigaya, oo si sax ah u sharraxaya waxa loo baahan yahay in si ka duwan loo qabto. Is xishmee. Ha bartilmaameedsan dabeecadda adeeg bixiyahaaga madaxa banaan. Weydii adeeg bixiyahaaga madax banaan inuu kaa caawiyo helitaanka xalka. Diirada saar sida aad ku xalin lahayd dhibaataada inta aad eegi lahayd wixii khaldamay.

Markaad xalin weydo dhibaataada adoo la hadlaya adeeg bixiyahaaga madaxa banaan, la hadal SC-gaaga. Waxaa laga yaabaa inaad adeeg bixiyahaaga madaxa banaan u siiso digniin ah in haddii ay wax wanaajin waayan aad shaqada ka eryi doonto. Tusaale, "Maadan ku shaqeynaynin wakhtigii aan ku heshiinay. Hadii tani aadan wanaajinayn bisha dambe, qof kale ayaan raadsanaya. "

Marka aad filashadaada adeeg bixiyahaada madaxa banaan ay isbedellan, hubi inaad u sheegto. Waxaa laga yaabaa inaad go'aansato oo aad dooneyso in wax si ka duwan loo sameeyo adeeg bixiyahaagana ma ogaan doono tan haddii aadan u sheegin. Ha u malayn in adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu ogyahay waxa aad rabto.

Sideen adeeg jadwalka ugu daraa?

Jadwalka adeeg bixiyahaaga ayaad dejisay marka ay kula shaqeynayaan. Jadwalka waa inuu ku beegnaadaa marka aad u baahantahay adeega. Waa inaad abuurtaa jadwal si uu kaaga caawiyo inaad la socoto marka adeegyadaada la bixinayo, gaar ahaan marka aad haysato wax ka badan hal qof oo adeeg bixiya madax banaan ah. Laba adeeg bixiyayaal lacag lama siin karo wakhti isku mid ah, sidaa darteed waxaad u baahan tahay inaad hubiso inaysan jirin iskudhac.

Marka aad dooneysid inaad beddesho jadwalka adeeg bixiyahaada madaxa banaan, isku day inaad ogeysiiso adeeg bixiyahaada madaxa banaan xilli hore. Marka adan awoodin inaad hesho adeega wakhtiga kuu qabsoontay, tusaale ahaan, markaad xanuunsantahay, sida ugu dhakhsaha badan ugu sheeg adeeg bixiyahaaga madaxa banaan.

Marka uu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan aanu raacin jadwalka aad dejisay, waxaa xilka saaran tahay inaad la hadasho isla markaasna aad xallisid dhibaataada. Waa inaad la hadashaa SC-gaada marka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uusan doonayn ama uusan karayn inuu ku shaqeeyo jadwalka aad rabto.

Marka uu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu ku dhaho beddel jadwalka, waad la shaqeyn kartaa iyaga hadii aad weli heleyso adeegyada lagu daboolayo baahidaada. Jadwalkaaga waa inuu ahaada waxa aad rabtid, oo aysan ku salaysnayn waxa adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu rabo.

Dabagalka qorshaheyga

Yaa dabagala adeegyadeyda iyo adeeg bixiyaasheyda?

Aadaa masuul ka ah inaad ogaato marka adeegyada la qoondeeyay iyo waxa la siinaya iyada oo qayb ka ah adeega. Dib waad u eegi kartaa jadwalka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan iyo lacag bixinta Therap si aad u hubiso in wakhtiga si sax ah loo soo sheego. Waxaa laga doonayaa inaad ogaato in adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani uu lacaga biilka si sax ah u qorayo. Adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan waa in aanu biilka bixin marka aad su'aalo ka qabto jadwalkan ama diiwaankaaga ku raacsanayn. Farqiga u dhaxeeya waa in la xaliya. Waxaa muhiim ah in la hubiyo in aanan khayaana la samayn.

Mar walba oo aad walaac qabto, la hadal SC-gaada. Waxay kaa caawin karaan sidii loo hubin in baahidaadu la daboolo. Waa inaad soo ogeysiisaa SC-kaaga marka aad isbeddel ku sameyso jadwalka adeeg bixiyahaaga madaxa banaan, maadaama ay tani saameyn ku yeelan karto miisaaniyaddaada.

Kormeerayaasha SC-ga si loo hubiyo in adeegyada loo fidiyo sida ku qoran qorshahaaga qofku ku saleysan. SC-gaada ayaa adiga iyo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan idin kala hadli doona sida ay wax u socdaan. SC-gaada waa inuu fiiriya adeeg bixiyahaaga madaxa banaan oo kula shaqeynaya.

Bixinta adeegyada is-jihaynta

Imisaan ku bixin karaa adeegyadaan?

Qadarka miisaaniyadda shaqsigu ah ee sanadlaha ah (IBA) waa qadar la mid ah midka ah xagga is-jihaynta sida ay tahay marka aad isticmaasho adeeg bixiyayaasha hay'adaha. IBA-daada waxaa lagu go'aamiyo habka qiimeynta hadafka. SC-gaaga wuxuu sheegayaa inaad IBA iyo kaa caawisaa inaad qorshayso inta saacadood aad adeeg bixiyaha madaxbannaan uu shaqeyn karo. Waa inaad ku ekaata miisaaniyadda sanadlaha. Waxaad la shaqeysaa SC-kaaga si loo hubiyo inaad leedahay lacag diyaar u ah sanadkaaga oo dhan oo ah adeegyada isbeddelka DD-da ee Medicaid HCBS.

Adeeg walba oo DD ah wuxuu leeyahay qiime aad ugu badnaan aad ku bixin karto bixiyahaaga madaxbanaan. SC-kaaga ayaa kuu sheegi doona qiimaha. Adiga iyo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan ayaa go'aan ka gaaraya waxaad bixin doonto. Ma jiro koror sicirka si toos ah. Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad bilowdo bixiyahaaga madaxbanaan wax ka yar qiimaha ugu sarreeya, si aad u siiso mushaar kordhin wakhti yar ka dib ama goortii ay waxyaaluhu si fiican u socdaan. Si aad u bedesho qiimaha adeeg bixiyahaaga, la hadal SC-gaada.

Qoyska iyo saaxibada ayaa ka caawin kara inaad maareyso miisaaniyadda, balse adiga masuul ka ah. Waa inaad la shaqeysaa waqtiga bixiyahaada madaxa banaan iyo weliba kharashka adeegyada si aadan u dhaafin miisaaniyaddaada sanadlaha ah. SC-gaaga ayaa kaala hadli doona isbeddel walba oo ku saabsan miisaaniyaddaada.

Adiga ayaa go'aamin kara adeegyada is-jihaynta wakhti walba. Markii aad go'aanka gaarto, waxaad dooran kartaa adeeg bixiyaha hay'adda, iyadoo la siinayo lacagta soo hartay oo ku jirto sanadka miisaaniyadda ee hadda aad ku jirto.

Sidee adeegyada loo ogolaada?

SC-gaada ayaa abuuraya ogolaashaha adeeg marka:

- Adeeg bixiyahaaga madaxa banaan uu heshiis taagan la leeyahay DHHS;
- Adeegyada iyo taageerada waxa lagu diiwaan geliya qorshaha adiga kuugu saleysan; iyo
- Lacag waxay ku jirta IBA-gaada.

Sideen kula socda IBA-geeyga?

Aadaa ka masuul ah miisaaniyadda IBA-gaada. Waxaa muhiim ah inaad haysato nidaam wanaagsan oo lagula socdo inta ku baxaysa adeegyada DD-gaaga. Toddobaadyada qaar ama bilaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaad u baahato saacado ka badan ama ka yar kan miisaaniyaddaada ku jira. Tani waa caadi, laakiin waxaad u baahan tahay inaad la qabsato toddobaadyada mustaqbalka iyo bilaha si aadan ooga bixin miisaaniyaddaada sanadlaha.

Haka cabsan inaad dadka kale caawinaad weydiisato. Miisaaniyad samaynta waxay noqon karta mid adag oo culays ah. Waa caadi haddii aadan rabin inaad keligaa sameyso. Mas'uulka sharciga ah, xubin qoyska ka mid ah oo lagu kalsoon yahay ama SC-kaaga ayaa kaa caawin kara.

SC-gaaga waxay kormeerayaan miisaaniyaddaada bil kasta. Waa inay ogaadaan jadwalka shaqo ee adeeg bixiyahaaga madax banaan. SC-gaag ayaa eegi doona si loo ogaado haddii aad heleyso adeegyada aad u baahan tahay iyo haddii aad joogto miisaaniyaddaada gudahood. Haddii loo baahdo, SC-yadaada ayaa kaa caawin doonta inaad bedesho qorshahaaga.

Maxaa dhacaya haddii ay IBA-du ay dhamaaneyso ka hor inta aanu sanadkeyga dhamaan?

Adeegyadaada iyo dhaqaalaha waxa loo ogolaaday sanad walba. Adaa masuul ka ah inaad xaqiijiso in miisaaniyaddaada sanadka ay ku ekaata miisaaniyadda sanadka. Waxaa laga yaabaa inay jiraan bilo ay qarashkaagu badan yahay, sidaas awgeed waxaad u baahantahay inaad hoos u dhigto qarashka bil kale si aad ugu ekaato miisaaniyaddaada. Lacag dheeri ah laguuma helikarayo ka hor inta aanay sannadka miisaaniyaddeedkaagu dhamaanin.

Adeeg bixiyaha madax banaan waa inuu aqbalaa lacag celinta Medicaid ay tahay sida bixinta oo buuxda ee adeegyada (bixinta DHHS oo lagu daray qaybta kharashka la qaybsaday, mhalkii ay khuseeyo). Sida ka qaybgalayaasha cafiska Medicaid HCBS, ma soo jeedin kartid, ma aqbali kartid, mana ogolaan kartid heshiiska lacag bixinta ee khaaska ah. Tusaale ahaan, ma siin kartid adeeg bixiyahaaga madaxa banaan waxyaabah dheeriga ah.

Maxaa dhacaya haddii aanan lacagta oo dhan ku bixin IBA-da?

Miisaaniyaddadu waxay ku wanagsantahay sanad. Marka aadan sanadka gudahiisa ku bixin miisaaniyaddaada shakhsiga ah ee sanadka gudahiisa, uma sii gudbin kartid sanadka xiga.

Waa maxay kharashka la qaybsaday?

Waxaa laga yaabaa inaad leedahay kharashka qaybsiga si aad u noqoto mid u qalma Medicaid. Adeegyada DD waxaa lagu bixiyaa cafiska Medicaid HCBS, sidaa daraadeed waa inaad heysaa Medicaid si aad u hesho adeeyo.

Marka aad qaybtaada kharashka la wadaagay aad heysato oo isla markana loo asteeyay adeeg bixiye madax banaan, lacagta waxa laga jaraya lacagtooda DHHS. Marka aad la shaqeysid adeeg bixiyayaasha madaxa banaan, waad dooran kartaa adeeg bixiyaha loo qoondeeyey in kharashka isla qaybsataan. Waxaa waajib kugu ah inaad bixiso qiimaha qaybsiga kharashka ee adeeg bixiyahaada. madaxa banaan.

Lacagta adeeg bixiyaheyga madaxa banaan

Lacagta la bixinayo waxa lagu diyaariyaa barnaamij la yiraahdo Therap. Faahfahin dheeraad ah oo ku saabsan lacag bixinta waxaad ka heleysa barnaamijka Therap [Nebraska adeeg bixiyaha madaxa banaan qaybtiisa](#). Waxaad dalban kartaa in Therap laguusiiyo fasax si aad u eegto lacagaha adeeg bixiyahaaga iyo waraaqaha kale ee adeeg bixiyahaaga. Therap waxay leedahay [Nebraska qaybta ka qaybgalaha/masuulk](#) adiga oo haya macluumaad kala cayn kasta ah oo adiga kuu gaar ah.

Si uu adeeg bixiyahaaga madaxa banaan u soo diro dalabka lacag bixinta, adeeg bixiyahaada waa inuu:

- Hayso ogolaansho adeeg oo cusub oo adeegyada la bixiyey ah;
- Isticmaal xaqiijinta viisaha elektorooniga ah (EVV) ee adeegyada u baahan;
- Lacag bixinta ka dib markii adeegyada la bixiyey;
- Hakua joogaan xilliga ay diyaarinayaan lacagta la bixinayo;
- Noqo adeeg bixiyaha kaliya ee kula shaqeeya (laba adeeg bixiyayaasha lacagta isku wakhti ma soo diri karaan);
- Wakhtigooda iyo imaanshaha ku diiwaangeli barnaamijka Therap ee adeegyada EVV aan ahayn;
- Diiwangeli xogta barnaamijka kobaca ee Therap; iyo
- Lacagta ku soo sheego mudda 180 malamood markaad bixiyay adeegi.

Markii aad adeeg bixiyahaaga madaxa bannaan weeydoiiso nuqulka macluumaadka deganaanshahooda ka helnaysid Therapiga, adeeg bixiyaha waa inuu ku siiyaa.

Markaad qabtid wax su'aal ah oo ku saabsan geedi socodka lacag bixinta la hadal SC-gaada.

Shaqqa ka erinta adeeg bixiyaheyga

Mar walba waxa jirta suurtagalnimada in adeeg bixiye madax banaan uusan sidaa rabtay u shaqeyneynin. Tani markay dhacdo, waxaad u baahantahay inaad shaqadooda joojiso. Tilmaantaan, hawsha shaqo ka erinta waxaan dhahna "in la eryl" balse waxaa laga yaaba inaad maqasho in la dhaho "eryid" ama "joojin."

Marka adeeg bixiyahaaga madaxa bannaani uu khatar geliyo caafimaadkaaga ama badqabkaaga, waa inaad isla markiiba shaqada ka ceurisaa una sheeg SC-kaaga. Markii aad ka shakiso in lagugu xadgudbay ama lagu dayacay, wac khadka xadgudubka/dayacaada ama wac booliska degmadaada.

Marka ay ku haysato dhibaato yar oo halis ah, laakiin aadan dooneyn la shaqaynta adeeg bixiyahaaga madaxa banaan, waa inaad heysa qorshaha qaabka iyo goorta aad shaqada ka eryi doonto. Marka aad fasaxdid adeeg bixiyaha madax banaan sababo la xiriira waxqabadka liita, waa inaysan noqon wax lala yaabo oo ku dhacda adeeg bixiyaha. Waxay ahayd inaad kala hadasho dhibaataadaas ka hor inta aadan go'aansan inaad isaga shaqada ka erido. *Eeg qaybta "Kormeerida adeeg bixiyaheyga".*

Haday macquul tahay, waa inaad adeeg bixiyahaaga siisa ogeysiis. Tani waxay siini wakhti ay shaqo kale ku raadiyaan. Adigana waxay ku siini wakhti aad ku raadisid adeeg bixiye kale oo madax banaan. Adiga oo wata qorshaha taxadarka, waxaa laga yaabaa inaad haysato qof aad buuxin karo, laakiin aad u baahan tahay inaad hesho adeeg bixiyeyaal madaxbanaan oo joogto ah.

Way adkaan kartaa in loo sheego adeeg bixiyahaada madaxa banaan in aadan mar dambe rabin adeegyadooda. Waxa wanagsan inuu qof kula joogo markaad u sheegyo. Is deji markaay caroodaan. Ku dhagnaaw xaqiiqada ku saabsan waxa aan shaqaynin oo sababo iyo tusaalooyin gaar ah ka sheeg. Noqo qof adag, balse naxariis leh. Marka adeeg bixiyahaaga uu haayo furaha gurigaaga ama hantida kale, hubi inaad dib u soo celiso.

Markii aad eridid adeeg bixiyaha madaxbanaan, waxaad u baahan tahay inaad u sheegto SC-kaaga si ay u cusboonaysiiso oggolaanshaha adeegaada. Adeeg bixiyaha madax banaan mar dambe looma oggolaan doono inuu kula shaqeeyo. Qofkani wuxuu weli noqon karaa adeeg bixiyaha madax banaan ee adeegyada cafiska ee Medicaid HCBS DD oo uu la shaqeeyo ka-qaybgalayaasha kale marka la xusho loona oggolaado inay sidaas sameeyaan. Adeeg bixiyaha madaxa banaan ee aan adiga kuugu haboonayn, waxaa laga yaabaa inuu qof kale ku haboon yahay.

Markale, marka uu adeeg bixiyahaagu halis ku galinayo caafimaadkaaga ama badbaadadaada, u sheeg hay'adaha dawladda ee qaabilsan. Adeeg bixiyaal madax banaan oo qaba tacaddi/dayacaad la hubiyay ayaa heshiiskoodaadeeg bixiyaha Medicaid ay DHHS joojin doonta mana bixin karo adeeyo cafiska Medicaid HCBS.

Goorma ayaan ka cayriyaa in aan fasaxo bixiyaheyga madaxa banaan?

Marka warbixinta ku saabsan xadgudubka ama dayacaadda laga caddeeyo adeeg bixiyahaaga madaxa banaan (ama xubin ka mid ah qoyska adeeg bixiyaha madaxa banaan, marka adeega laga bixinayo gurigooda), xeerka DHHS wuxuu qaba in heshiiska adeeg bixiyaha si degdeg ah loo joojiyo. Taasi waa run marka la eego xukunnada lagu xukumay qaar ka mid ah dembiyada laga helay xeerka gobolka. Markii, wakhti kasta, aad ka warqabto arrimahan la xiriira adeeg bixiyahaaga madaxa banaan, waa inaad u sheegtaa SC-kaaga si tallaabo haboon loo qaado.

Cabashada

Marka aad walaac ka qabto adeegyada caymiska DD-da ee aad ka heleyso, waa inaad marka hore la xiriirtaa DD SC ee lagu xilsaarantahay.

Cabashooyinka ku saabsan bixinta adeegyadaaga ama isuduwidada adeegga waxaad sameyn kartaa adoo wacaya lambarka lacag-la'aanta ah (877) 667-6266, emailka DHHS.DDDCommunityBasedServices@nebraska.gov, ama adoo adeegsanaya foomka cabashada internetka.

Linkiga

- Shabakada DHHS:
 - [Adeeg bixiyaha HCBS: https://dhhs.ne.gov/Pages/Medicaid-Home-and-Community-Services-Provider-Information.aspx](https://dhhs.ne.gov/Pages/Medicaid-Home-and-Community-Services-Provider-Information.aspx)
 - [Adeeg bixiyaha DD: https://dhhs.ne.gov/Pages/DD-Providers.aspx](https://dhhs.ne.gov/Pages/DD-Providers.aspx)
 - [EVV Information: https://dhhs.ne.gov/Pages/Electronic-Visit-Verification.aspx](https://dhhs.ne.gov/Pages/Electronic-Visit-Verification.aspx) and <https://dhhs.ne.gov/Pages/Therap-Electronic-Visit-Verification.aspx>
 - [Provider Bulletins: https://dhhs.ne.gov/Pages/Medicaid-Provider-Bulletins.aspx](https://dhhs.ne.gov/Pages/Medicaid-Provider-Bulletins.aspx) and <https://dhhs.ne.gov/Pages/DD-Provider-Bulletins.aspx>
 - Macluumaadka: <http://dhhs.ne.gov/Pages/DD-Resources.aspx>
 - Tababrka: <http://dhhs.ne.gov/Pages/DD-Training.aspx>
- Sidee loo noqda adeeg bixiye madax banaan: <https://dhhs.ne.gov/Guidance%20Docs/How%20to%20Become%20an%20Independent%20Provider.pdf>
- Qalabka adeeg bixiyaha EVV: <https://dhhs.ne.gov/DD%20Documents/DD%20Ind%20Provider%20EVV%20%20Toolkit.pdf>
- Tababarka shaqada adeeg bixiyaha: <https://dhhs.ne.gov/DD%20Documents/Independent%20Provider%20Orientation.pdf>
- Nebraska 211: www.ne211.org
- Nebraska Resources and Referral System (NRRS): www.nrrs.ne.gov
- Shabakada Therap:
 - Nebraska Independent provider section: <https://help.therapservices.net/app/nebraska-independent-providers>
 - Nebraska Participant/Guardian section: <https://help.therapservices.net/app/nebraska-individuals-guardians>
 - Dugsigta tababarka <https://support.therapservices.net/training-academy/>